# Suurat Al-Xaaqqah

# سُورَةُ الحَاقَّةِ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis Guud iyo mid gaaraba naxariista.

ٱلْحَآقَّةُ ﴿١﴾

1. Maalinta Xaaqo (Qiyaamadu waa wax sugan).

مَا ٱلْحَآقَّةُ ﴿٢﴾

2. Xaaqo maxay tahay.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا ٱلْحَآقَّةُ ﴿٣﴾

3. inaadan aqoon ma laga yaabaa xaaqada.

كَذَّبَتْ ثَمُودُ وَعَادٌۢ بِٱلْقَارِعَةِ ﴿٤﴾

4. Waxa beeniyeen Reer «Thamuud» iyo «Caadba» Qiyaamada.

فَأَمَّا ثَمُودُ فَأُهْلِكُوا۟ بِٱلطَّاغِيَةِ ﴿٥﴾

5. Thamuudse waxaa lagu halligay Qaylo daran.

وَأَمَّا عَادٌ فَأُهْلِكُوا۟ بِرِيحٍ صَرْصَرٍ عَاتِيَةٍ ﴿٦﴾

6. Caadna waxaa lagu halligay Dabayl daran oo qabow.

سَخَّرَهَا عَلَيْهِمْ سَبْعَ لَيَالٍ وَثَمَٰنِيَةَ أَيَّامٍ حُسُومًا فَتَرَى ٱلْقَوْمَ فِيهَا صَرْعَىٰ كَأَنَّهُمْ أَعْجَازُ نَخْلٍ خَاوِيَةٍ ﴿٧﴾

7. oo lagu diray korkooda Toddoba habeen iyo Siddeed Maalmood oo israacsan, waxaadna arkaysaa iyagoo daadsan ood mooddo jirrid Timir (dogob dhacay).

فَهَلْ تَرَىٰ لَهُم مِّنۢ بَاقِيَةٍ ﴿٨﴾

8. wax ka hadhay miyaad aragtaa.

وَجَآءَ فِرْعَوْنُ وَمَن قَبْلَهُۥ وَٱلْمُؤْتَفِكَٰتُ بِٱلْخَاطِئَةِ ﴿٩﴾

9. Fircoon iyo kuwii ka horreeyeyna waa jireen iyo kuwii gafsanaa ee la daba geddiyey (Nabi Luudh Qoomkiisi).

فَعَصَوْا۟ رَسُولَ رَبِّهِمْ فَأَخَذَهُمْ أَخْذَةً رَّابِيَةً ﴿١٠﴾

10. Waxay Caasiyeen rusushii Eebahood Markaasuu si daran u qabtay,.

إِنَّا لَمَّا طَغَا ٱلْمَآءُ حَمَلْنَٰكُمْ فِى ٱلْجَارِيَةِ ﴿١١﴾

11. Markay Biyihii xad dhaafeen (Waqtigii Nabi Nuux) waxaan idinku xambaarnay (Awoow yaalkiin) Doontii.

12. si aan uga yeelno waano ay una xafiddo dhag wax maqasha.

لِنَجْعَلَهَا لَكُمْ تَذْكِرَةً وَتَعِيَهَآ أُذُنٌ وَٰعِيَةٌ ١٢

Qiyaamadu waa xaq sugan, Ciddii Xoog isbiddana oo xaqa iyo Qiyaamada beenisana Eebaa ka awood badan, sida Aayadahani noo Caddeeyeen, sida Qoonkii Nabi Saalax, Nabi Huud, Nabi Luud, Nabi Nuux iyo Fircoon iyo kuwii ka horreeyey. waana in lagu waana qaato Arrintaas, xumaanta xaq diidnimada iyo Kibirkana la iska jiro waa sababaha halaagee.
Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): Waxaa laygu gargaaray (Dabaysha) Saba, ree Caadna waxaa lagu halaagay (Dabaysha Dabuur). Al-Xaaqqah (1-12).

---

13. Marka Suurka la afuufo hal mar.

فَإِذَا نُفِخَ فِى ٱلصُّورِ نَفْخَةٌ وَٰحِدَةٌ ١٣

14. Dhulka iyo Buurahana la xambaaro oo la burburiyo hal mar.

وَحُمِلَتِ ٱلْأَرْضُ وَٱلْجِبَالُ فَدُكَّتَا دَكَّةً وَٰحِدَةً ١٤

15. Maalintaasay Qiyaamadu dhacaysaa.

فَيَوْمَئِذٍ وَقَعَتِ ٱلْوَاقِعَةُ ١٥

16. Samaduna Maalintaas way dillaaci wayna tabar yaraan.

وَٱنشَقَّتِ ٱلسَّمَآءُ فَهِىَ يَوْمَئِذٍ وَاهِيَةٌ ١٦

17. Malaa‘igtuna Cirka gaararkiisa yey ahaan Maalintaas, Carshiga Eebana waxaa dadka korkiisa ku xambaari Maalintaas Siddeed Malag.

وَٱلْمَلَكُ عَلَىٰٓ أَرْجَآئِهَا وَيَحْمِلُ عَرْشَ رَبِّكَ فَوْقَهُمْ
يَوْمَئِذٍ ثَمَٰنِيَةٌ ١٧

18. Maalintaasaa dadka loo soo bandhigi Eebe wax xagooda kaga qarsoonna ma jiro.

يَوْمَئِذٍ تُعْرَضُونَ لَا تَخْفَىٰ مِنكُمْ خَافِيَةٌ ١٨

19. Ruuxiise Kitaabkiisa midigta laga siiyo wuxuu dhihi (farax daraadiis) akhriya Kitaabkayga.

فَأَمَّا مَنْ أُوتِىَ كِتَٰبَهُۥ بِيَمِينِهِۦ فَيَقُولُ
هَآؤُمُ ٱقْرَءُوا۟ كِتَٰبِيَهْ ١٩

20. Waxaan yaqiinsanaa (Adduunka) inaan la kulmi Xisaabtayda.

إِنِّى ظَنَنتُ أَنِّى مُلَٰقٍ حِسَابِيَهْ ٢٠

21. wuxuu ruuxaasi ku noolaan nolol laga raalli yahay.

فَهُوَ فِى عِيشَةٍ رَّاضِيَةٍ ٢١

22. Wuxuuna geli «Janno» sarreeysa.

فِى جَنَّةٍ عَالِيَةٍ ٢٢

23. Midhaheeduna u dhaw yihiin (Ruuxa guran).

قُطُوفُهَا دَانِيَةٌ ٢٣

24. Waxaana lagu dhihi Cuna oo Caba idinkoo shifaysan Camalkaad hor marsateen ayaamihii tegay daraadiis (Adduunkii).

كُلُوا وَاشْرَبُوا هَنِيٓـًٔا بِمَآ أَسْلَفْتُمْ فِى ٱلْأَيَّامِ ٱلْخَالِيَةِ ﴿٢٤﴾

Eebe isagaa awoodda leh abuurayna Dunida, wuxuuna dadka u darbay maalinta Qiyaame oo Ruux walba laga Abaal marin Camalkiisii, waa Maalinta Dhulka, Buuraha iyo Cirkuba doorsoomi oo burburi, wax Eebe ka qarsoomi ama ka fakanna uusan jirin, dadka wanaagsanna waxaa lagu abaal marin wanaag, Janno, Farax iyo Bishaaro ku noolaansho.
Cumar Binu Khadhaabna wuxuu yidhi: Xisaabiya Naftiina intaan la xisaabinin Miisaamana intaan la miisaamin iyadaa idiin ka fudud Xisaabta Bariye.
isuna Qurxiya Bandhiga wayn. Al-Xaaqqah (13-24).

---

25. Ruuxiise Kitaabkiisa laga siiyo Bidixda wuxuu dhahayaa Magacayba'ee maan la i siinin Kitaabkayga.

وَأَمَّا مَنْ أُوتِىَ كِتَٰبَهُۥ بِشِمَالِهِۦ فَيَقُولُ يَٰلَيْتَنِى لَمْ أُوتَ كِتَٰبِيَهْ ﴿٢٥﴾

26. Xisaabtaydana maanan ogaanin.

وَلَمْ أَدْرِ مَا حِسَابِيَهْ ﴿٢٦﴾

27. Magaacayba'ee maxaan u soo noolaaday.

يَٰلَيْتَهَا كَانَتِ ٱلْقَاضِيَةَ ﴿٢٧﴾

28. Xoolahaygi wax iima tarin.

مَآ أَغْنَىٰ عَنِّى مَالِيَهْ ﴿٢٨﴾

29. Waxaa lumay awooddaydii (iyo xujadaydii).

هَلَكَ عَنِّى سُلْطَٰنِيَهْ ﴿٢٩﴾

30. Waxaa loo odhan qabta oo Gacmihiisa iyo luquntiisa isku xira.

خُذُوهُ فَغُلُّوهُ ﴿٣٠﴾

31. Naarta Jahannamada geliya.

ثُمَّ ٱلْجَحِيمَ صَلُّوهُ ﴿٣١﴾

32. Markaas geliya Silsilad Toddobaatan dhudhun ah.

ثُمَّ فِى سِلْسِلَةٍ ذَرْعُهَا سَبْعُونَ ذِرَاعًا فَٱسْلُكُوهُ ﴿٣٢﴾

33. maxaayeelay wuxuu ahaa kaan rumaynin Eebaha weyn.

إِنَّهُۥ كَانَ لَا يُؤْمِنُ بِٱللَّهِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٣٣﴾

34. aana fari jirin in Masaakiinta wax la siiyo.

وَلَا يَحُضُّ عَلَىٰ طَعَامِ ٱلْمِسْكِينِ ﴿٣٤﴾

35. Maanta (Qiyaamada) kuma leh Saaxiib.

فَلَيْسَ لَهُ ٱلْيَوْمَ هَٰهُنَا حَمِيمٌ ﴿٣٥﴾

36. Cunnana kuma leh aan ahayn dhaacaanka « Ehlu Naarka ».

وَلَا طَعَامٌ إِلَّا مِنْ غِسْلِينٍ ﴿٣٦﴾

37. Cunnadaasna ma cuno kuwa gafay waxaan ahayn (Gaalada).

لَّا يَأْكُلُهُۥٓ إِلَّا ٱلْخَٰطِـُٔونَ ﴿٣٧﴾

38. Waxaan ku dhaaran waxaad aragtaan (Makhluuqaad ah).

فَلَآ أُقْسِمُ بِمَا تُبْصِرُونَ ﴿٣٨﴾

39. iyo waxaydaan arkayninba.

وَمَا لَا تُبۡصِرُونَ ٣٩

40. ee Qur‘aanku waa hadalkii Eebe uu u soo dhiibay Rasuul Sharaf leh.

إِنَّهُۥ لَقَوۡلُ رَسُولٖ كَرِيمٖ ٤٠

41. Hadal gabayaana ma aha, wax yar yaadse rumaynaysaan (Xaqa).

وَمَا هُوَ بِقَوۡلِ شَاعِرٖۚ قَلِيلٗا مَّا تُؤۡمِنُونَ ٤١

42. Hadal wax sheegana ma aha wax yar yaadse waantoomaysaan.

وَلَا بِقَوۡلِ كَاهِنٖۚ قَلِيلٗا مَّا تَذَكَّرُونَ ٤٢

43. (Qur‘aanku) wuxuu ka soo degay Eebaha Caalamka.

تَنزِيلٞ مِّن رَّبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٤٣

Xaqdiidayaasha waxaa lagu abaal marin maalinta qiyaame xumaantay kasbadeen, waxaana laga siin Kitaabkooda xagga bidix, markaasay Calaacali, waxaana la gelin Naar daran oo Cunno iyo Cabid Xun Mooye Wax kale lahayn. Qur‘aankuna waa hadalkii Eebe, Rasuul sharaf leh yaana Eebe ku soo dejiyey, xumaanta iyo Ceebaha ay Gaaladu ku sheegeenna waa ka fog yahay, waana digniin iyo raxmadda Caalamka. Al-Xaaqqah (25-43).

---

44. Hadduu nagu been abuurto (Nabi Muxamed).

وَلَوۡ تَقَوَّلَ عَلَيۡنَا بَعۡضَ ٱلۡأَقَاوِيلِ ٤٤

45. Waxaannu ku qaban gacan adag.

لَأَخَذۡنَا مِنۡهُ بِٱلۡيَمِينِ ٤٥

46. Waxaannu gooynaynaa Xididka Wadnaha.

ثُمَّ لَقَطَعۡنَا مِنۡهُ ٱلۡوَتِينَ ٤٦

47. Ruux idinka mid ah oo naga ce-linnna ma jiro.

فَمَا مِنكُم مِّنۡ أَحَدٍ عَنۡهُ حَٰجِزِينَ ٤٧

48. Qur‘aankuna waa waanada kuwa Eeba ka dhawrsada.

وَإِنَّهُۥ لَتَذۡكِرَةٞ لِّلۡمُتَّقِينَ ٤٨

49. Waxaan ognahay inay idin ka mid yihiin kuwa beenin (Qur’aanka).

وَإِنَّا لَنَعۡلَمُ أَنَّ مِنكُم مُّكَذِّبِينَ ٤٩

50. Qur‘aanku waa qoomamada Gaa-lada (Maalinta Qiyaame).

وَإِنَّهُۥ لَحَسۡرَةٌ عَلَى ٱلۡكَٰفِرِينَ ٥٠

51. Qur‘aanka waa run dhab ah.

وَإِنَّهُۥ لَحَقُّ ٱلۡيَقِينِ ٥١

52. Ee Nabiyow u tasbiixso Magaca Eebe ee weyn.

فَسَبِّحۡ بِٱسۡمِ رَبِّكَ ٱلۡعَظِيمِ ٥٢

Qur‘aanku waa hadalkii Eebe Nabiga Muxamad ah (Naxariis iyo Nabad gelyo korkiisa Eeba ha yeelee) uu ku soo dejiyey, Malaku Jibriilla soo gaarsiiyey, mana siyaadin karo Qur‘aankuna waa waanada Mu‘miniinta iyo kuwa xumaanta ka dhawrsada, waana xujo iyo qoomamada Gaalada, waana xaq sugan. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: Watiinku waa taxanaha Qalbiga waana Xididkuu ku xidhanyahay. Al-Xaaqqah (44-52).